


Tilmaamaha

**Sida loo codeeyo**



Si buuxda u buuxi goobaabinta ku ag taal dookhaaga.

**Sida loo saxo khalad**



Haddii aad saxid sameynayso, xariiq dulmari dookhaas oo dhan, oo ay ku jirto goobaabinta. Markaa kadib buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga cusub.

**Codeynta ka bilow halkan**



**Degmada**

**Degmada King**

**Soo Jeedinta Lr. 1**

**Canshuurta Nidaam Goboleedka Aqoonsiga Sawirka Faraha ee Otomaatigga ah (AFIS)**

Golaha Degmada King ayaa ansixiyay Xeerka Lr. 19884 ee khuseeya soo jeedintaan la xiriirta canshuurta nidaam goboleedka aqoonsiga sawirka faraha ee otomaatigga ah (AFIS). Soo jeedintaan waxay maalgelin doontaa sii wadidda hawlgalka barnaamijka AFIS si loo bixiyo teknoolajiyad iyo adeegyo casri ah oo lagu baaro sawirka faraha iyo calaacasha si ay gacan uga geystaan maamulidda caddaaladda. Waxay oggolaanaysaa canshuur hanti dheeraad ah oo muddo toddoba sanno ah laga bilaabo 2026 oo ah \$0.0275 ka mid ah \$1,000 ee qiimeynta la qiimeeyay, iyadoo la adeegsanayo caddadka canshuurta ee 2026 si loo xisaabiyo xaddidaadyada ku xusan Cutubka 84.55 RCW ee ku aaddan canshuuraha ku xiga ee sannadaha 2027-2032, lagana dhaafayo waayeellada, halyeeyadii hore, iyo dadka naafada ah ee u qalma sida ku xusan RCW 84.36.381. Ma tahay in soo jeedintaan la:

**Ansixiyo**

**Diido**

**Dugsiga**

**Degmada Dugsiga Enumclaw Lr. 216**

**Soo Jeedinta Lr. 1**

**Canshuurta Maalgelinta Mashaariicda**

Guddiga Agaasimeyaasha ee Degmada Dugsiga Enumclaw Lr. 216 ayaa hirgeliyay Qaraarka Lr. 1139 ee khuseeya soo jeedin canshuur maalgelin ah. Soo jeedintaan waxay Degmada u oggolaanaysaa inay canshuur ku soo rogto canshuuraha xad dhaafka ah ee dhammaan hantida la canshuuri karo ee gudaha Degmada si loogu dayactiro, loo beddelo loona horumariyo xarumaha hore u jira ee Degmada:

<u>Sannadaha Ururinta</u>	<u>Qiimaha Canshuurta ee La Qiyaasay/\$1,000 ee Qiimeynta La Qiimeeyay</u>	<u>Caddadka Canshuurta</u>
2026	\$0.37	\$3,000,000
2027	\$0.36	\$3,000,000
2028	\$0.34	\$3,000,000
2029	\$0.33	\$3,000,000

Ma tahay in soo jeedintaan la ansixiyo?

**Haa**

**Maya**

Warqadda codbixinta waxay ka bilaabataa dhinaca kale,  
u rog dhinaca kale si aad codeynta u biloowdo.



Sample